UNIVERSITY OF BOSASO
Bosaso, Puntland State of Somalia

جامعة بوصاصو
بوصاصو،ولاية بونتلاند - الصومال

Cilmida iyo barashada af soomaaliga
Af-somaliga jamacada **UOB**

Afka dhaqanka soomalika iyo degaanka soomaliya

Afsoomaaligu waxaa kasoo jeeda am aka mid yahay afafka Bahwaynta **KUSHITI (CUSHIT) KUUSH (CUSH)**waa wiilkii Nabi **NUUX**

1. Saam :-dadka cadcad qurux badan
2. Xaam :-dadka mad madaw
3. Yaafis :- indha yaryar

S. muxuu ukala baxaa af soomaaligu?

J.Tix iyo Tiraab
Sugaan iyo Hadal
Suugaantu waxay leedahay qaafiyad hab iyo jaangoyn iyo weliba qaafiyaduwaa xarafka maanso ku socda.

Qaybaha suugaanta ama maansada

i. b. Gabay
ii. t.Geeraar
iii. j.Masafo
iv. x. jiifto
v. kh.wiglo

afka dhaqanka sooyaalka iyo deegaanka soomaaliya xeerar

1. In aan laga hadlin af qalaad ka maarmi waa mooye.
2. In aan dhammaanteen nahay talo wadaag.
3. In aan cidkasta oo howsheena inoo ku fara dhuudhuunab soo dhoweyno.
4. In aan ilaalino habsami socodka xisaasada.
   - ✓ Qaafiyada waa xarafka maanso ku socoto **qaafiyad** waxaa lidi ku ah **Deelqaaf.**
   - ✓ Meesha uu kasoo jeedo afka soomaaligu

Suugaanta waxaa ugu muhiimsan maanso oo ah:-

1. **Gabay**
2. Masafo
3. **Wiglo**
4. **Buraanbur**
5. **Geeraar**
6. **Jiifto**
7. **Guurow**

Waxaa kaloo jira Hees hawleed iyo Hees ciyaareedyo

- Murti iyo madadaalo.
- Googaalaysi
- Carab jalqis

Maansada waxaa loo adeegsadaa

- **Ammaan**
- **Caay**
- **Habaar**
- **Duco**
- **Kicin**
- **Dejin**
- **Guuhaan**
- **sarbeeb**

qaaybaha af soomaaliga

- Magac
- Magac Uyaal
- Fal
- Falkaab
- Meeleye
- Tilmaame
- Xiriiriye
- Qodob
- Astayn

✓ Qodob Nin Ninka

Layliga

Macnaha ereyga suugaan cidi bixisay iyo xiligiisi
Suugaan waxaa bixiyey kooxda goosanka afka soomaaliga sannadkii 1950
Suugaantu waa iidan,suugo ama cagaarka xoolu daaqaan.

Heerarkii kala duwana ee uu soomaray qoraalka afka soomaaligu

Qarnigii 15aad -16aad

1. Sheikh yuusuf axmed maxamed shikh yusuf (al kownayn) aw barkhadle .wuxuu ahaa ninkii ugu horeeyey ee quraanka ku hingaadiyey afka soomaaliga wuxuu u dhashay **ciraaq**.
2. 1920 waxaa soo baxday farti cusmaaniyada ee uu qoray **Cismaan yuufus keenadiid.**
3. **1933** fartii la oranjiray qadabiirsi ee uu qoray sheikh c/rahmaan sheekhnuur.
4. 1950 farti kadariya waxaa qoray xuseen shikh ahmed kadare.
5. 1965-1966 waxaa la sameeyey gudigii afka soomaaliga.
6. 1969 20 0ct inqilaabki maxamed siyaad bare
7. 1969 15 aoc xiligii la dilay alaha u naxariistee madaxwayne c/rashiid cali sharmaarkee.
8. 1969 21 oct qoraalkii afka soomaaliga.
9. Qaamuuska afka soomaaliga waxaa qoray yaasiin cismaan keenadiid 1973.

10. July1974-julay1975 ololaha hormarinta reer miyiga (O.H.R.M).

Hodantinimada afka soomaaliga

Maalmaha todobaadka

- Beri
- Saadame
- Saakun
- Saaberi
- Sidataal

Waxaa afka caqabad ku ah

1. Gumaystayaasha
2. Ganacsigii dadka carbeed af ka waxaa ilaaliya
3. In wax lagu qoro waxna lagu barto
4. Warbaahinta

Dhaqanka

Hidduhu waa waxkasta oo umadi ku dhaqanto ama lagu yaqaan.

1. Diinta
2. Dad ay cunadoodu ku xiranahay cad iyo caano
3. Nabadda jecel
4. Marti soorka
5. Magan galinta
6. Daris wanaaga
7. Dharxirashada
8. Dad geesiyaal ah /dagaal yahan.

Qaybaha guurka soomaalida

1. **Gabar la doonay**
2. **Gabar lala baxay:-**
3. **Gabar la dhabar garaacday:-**waa marka si xoog ah wiilku gabadha ula baxo.
4. **Gabar la Dumaalay:-**waa markii walaalkaa dhinto oo aad xaaskiisa guursato.
5. **Gabar Xigsiisan loo bixiyey:-**marka ninku xaaskiisi dhimato walaasheed uu guursado.
6. **Gabar Godobtir loo bixiyey:-**waxaa la dhahaa guur xaaleedo.
7. **Gabar Heeran ah**

1. **Gabaati :- (ga)—(guur)** yaradka ka hor xoolo ama wax kale oo yar oo la bixiyo oo la siiyo qofka ama raga gabadha baxshey,amaba gabadha walaalkeed,ina'adeerkeed.
2. **Yarad (ka)-(guurka)** kan wax guursana haya iyo ciddiisu waxa ay u bixiyaaan in guriga cusub oo abuurmo lagu dhiso ;yaradka iyo dhibaaddu waa gundhiggii guriga cusub dhaqaalihiisa.
3. **Dhibaad**(-ta)-- xoolodhibaad ah , gabadha la guursadey siin,ku darid.
4. **Kaalo (-da)** wax wada jir loo uruursho oo cid ama arrin ,gargaar ahaan loo siiyo ama wax loogu qabto ;siin;diiqo;xoolaggooyo.

Aqalka arooska waxaa la taagaaa maalinta axada waxaa loo jeediyaa Bari ama Qorax kasoo bar
Waxaa laga wadaa in reerkan waa cusub u beryey.
Islabixid: waa marka wiilka iyo gabadhu ay ku heshiiyaan inay isla baxaan.

Qaybaha aqal soomaaliga

Dhuu:- waa harag dhar ahaan loo adeegsan jiray waa harag la magdiyey la jilciyey.
Qodax :- waa wixii qori ka samaysan sida udub dhig lool.
Saar:- waa wax alaale wixii aqalka lagu dhiso ama la goglado.
Gurgur :- waa alaabta cuntada iyo cabida.
Sarrad:- wax alaale wixii xargo ah.
Jil:- waa xariga laysugu xiro qoryaha dhigaha.
Udbaha:- haamaha iyo xargaha waxaa lagu ilaaliya asal.
Gogasha:- darin darfoolay ah ,harag waylaalis
Agabka cuntada:- xeero,fandhaal,dhiilo,haamo,sibraar,xabka,haruubo,kalax.
Agabka xoolaha lagu waraabiyo qude:-Fandhaal,Haanta subaga lagaga soo guro.
Awrka gurgurka: waa hayin waxaana lasaaraa wixii muhiima sida caruurta biyaha.
Awrka suradd:-waa awrka lasaaro alaabta.
Agabka xoolaha lagu waraabiyo

- Wadaan
- Qabaal
- Naar /naad
  Xarkaha :xariga dhagaati
  Dhafar waa xariga ugu muhimsan awrka marka lasaaro heeryo
  Karbaash :-waa maryo badan oo laysku tolay oo ratiga la saaro rarka ka hor .
  Abjaad:- waxay caawinayaan karbaashka

  - **Xarig baa lagaba maarmaan ah**

  Bayd :-waa xariga gaadada lagu geliyo.
  Cayn :-waa inuusan dheeliyin
  Daba gelis :-inuusan horay rarka aadin.
  Gocoyo **gacayo:-** waa weelka latolay oo aan weli la adeegsan.

Heesta kebeda

- Koronkor cunimaynoo
- Karibamaynee
- Karuur geel mayaala
- Naagta kedeba leheey
- Kaalin daranaay
- Adaan keyd hour dhigaan

Gartii iyo xeerarkii soomaalida

- Dadka waxaa kala saari jiray guurti iyo xeerbeegti.
- Goobta garsoorka soomaalidu wuxuu ahaan jiray geed hoosti.
- Ilaahow aqoondaro hanagu cadaabin aqoon darana hanagu cadaabin.
- Qaybaha garta
- Gar curad ah
- Gar ugub ah
- Garyigil

- Gardiid
- Hagarbay (**waa xoolaha laga qaado dadka loo gar naqaayo).**
- Markhaatiyaal
- Raacshe (**mudici).**
- La raacshe (**mudici calayhi).**
- Jilib culus ,jilib caro :-waa gar adag.

Maahmaaho garta leedahay

- Gari laba nin kama wada qosliso
- Gari allay taqaana
- Gar waa loo islaam
- Gardaaraale ma guulaysto
- Gardiid waa alle diid
- Gardaro looma garab yeelo

Meesiyaasha xoolaha soomaalida

- Geela
- Lo'da
- Arri
- Gammaan (Fardo.Baqlo,Dameero)

Geela

Geela	Anfaca	Cimriga geela	Sidkiisu waa
Magta	**magaabo waa :- cantuugo**	Da'da geela 28-30	12 bilood
Yarad	**cadka:- meel hal lagu qalay mana hilib yara mana hadal yara.**		
Gaadiid	**Caano :- magaabo geel galin bay ku wadaa**		
Adkeysiga			
cad iyo caano			

Seddex cod ee geela

1. Olol (markuu wuxuu jecelyahay waayo)
2. Cabaad(marka la dhibaayo)
3. Reew /Guux (markuu helo wuxuu jecel yahay

Qoorka geela

Qoorka geela (baarqab)

Markii la xiniinyo saaro (**koron)**
Markaay hasha ubahan tahay ratiga (**Abasax)**
Nirgo+Aaran +qaalin =**hal**
100 markuu gaaro waa **kadib**

- Gugay dhalatay geed lagu xiryay xariga loo gabi.
- Gugi xigayna guufaadhi badan maraqa googaysa.
- Gugi xigayna **(gaalemadiyo)**dhogorta qaar gooysay
- Gugi xigayna garanuug sided geela ka horeysay
- Gugi xigayna awr garabsatooy gaajo la abrarto.
- Gugi xigayna good nirig dhashoy gaawi lagu buuxsho.

- ✓ Geelu markuu dhalo waa **Rumad**
- ✓ 7-8-9 qaalin kurinta waxaa loo yaqaan **(Abeer)**
- ✓ Awrkay ku curato waxaa loo yaqaan (**Guubis)**
- ✓ **Igar :-** waa neefka geela maqaarka lagu maalo
- ✓ **Sidig:-** waa marka labo ilmood hal wada nuugaan.

Maahmaada geela

- ✓ Geelna waa galgashaa Ragna ways gediyaa.
- ✓ Geel waa geel wixii gooyana waa geel
- ✓ Geel baan doonaya geeso dhiigle bay dhashaa.
- ✓ Geel kala maqnaan jiray iyo geelba waysu ololaa.
- ✓ Ratiga hore ratiga dambe saanqaadkiisu leeyahay.
- ✓ Geeljire geela waa wada jiraa waana kala jiraa.

Qaamuus waa bug wayn ama liis dheer oo isugu xiga sida xarfuhiisu ukala horeeyaan iyadoo laga bilaabayo xarafka A lagu dhamaynayo Xarafka Y laguna helo micnohooda
Waxaa qoray **YAASIIN CISMAAN YUUSUF KEENADIID**

- ✓ Geelu wuu jecay : waa marka geelu cusbo ubaahan yahay ama caraysiinayo / Daran.
- ✓ Sidig waa labo halaad oo wadaaga hal ilmood
- ✓ Gayaxayn : waa marka lawada maro
- ✓ Haddii lamaro mid horaada iyo mid dameeda waxaa ladhahaa **(Tallantaali)**
- ✓ Labada hore horaado
- ✓ Labada dame dameeyo
- ✓ Hasha naasaheeda midig xiga waxaa la dhahaa**miskeedo**.
- ✓ Labada bidix waxaa ladhahaa **Haaneed.**

LO'DA

Lo'da da'deedu waa	Sidkeedu waa
20 sano	9 bilood

----------cida banaaxi----------
Waylo+Aalo+qalin=sac
Sacu marka uu dibida u baahdo waxaa loo yaqaana **Cago deg /Ludo deg**
lo'du markay tiro door ah gaarto waxaa looyaqaana **Fadhi .**

midabada lo'da

Dhiin	Bay	Cadaan	Waraase	Cadaan

Heesaha lo'da

- Tuurta gubin ah
- Oo tuuka ha le'eg
- Bay tukubiyow
- Wanaagsane waras
- Waylu xala dhalay
- Wiil la moodyoo
- Loo wan qali gaar
- Warasaha godan
- Walaalna hasiin
- Wedna ka ogow
- Dhiin muduuaow
- Adaa dhiil wayn
- Oo dhita utaal lagaa
- Lagaa dhoora

Maahmaahyada lo'da

- ✓ Baadi lo'aad biyaa loo fariista
- ✓ Caraabo lo'aad caws looma tilmaamo
- ✓ Boowda lo'aad bar waa biyo
- ✓ Lo'I labada horana biyo hakula jirto labada dambana baad hakula jirto.

Subaga lo'da waxaa loo yaqaan **(Maakhiri)**
Geela waxay la wadaagtaa (**ishkin)**
Riyahana **(Geetay)**
Gammaanka (**Nuguf)**

Ariga

Ari waa **riyo** iyo **ido**

Da'da arigu waa	Sidkoodu waa
10-13	5 bilood

Qoorka idaha waxaa loo yaqanaa (**Sumal)**
Marka la xininyo saaro **(Mallooli)**
Qoorka riyaha waxaa loo yaqanaa **(Tuke)**
Marka la xininyo saaro waxaa loo yaqaan **(Sogob)**
Taawi uqooq : waa marka xoolo qooqan oo doob saadalinayaan
Xawil :- waxaa loo xiraa idaha sqoorkooda si uusan ugu tegin.
Waxay dhalaan naylo+baraar+sabeen
Dharan :-waanmarkii madaxu wada cad yahay
Galaal :- xoolo;ido madaxa ama qaarkiisa oo cad.

Kho / deg /ferdah

- Markaay barcad leedahay : waa **Gabal .**

- Markaay barida madaw ku leedahay waxaa loo yaqaan **Saalimo**
- Markaay laxdu u baahan tahay wanka waxaa loo yaqaan **Oslid**
- Riyahana waa **Orgood .**
- Maqalo+waxaro+ugayb+ceesaamo

Heesaha / maahmaaha ariga

Idaha

- Xaayi himan dhaqaan
- Xirmaqaato,
- Xariir ma huwado
- Daylo foorara
- Alowfad ucuri
- Oo nakala furo
- Awlaalka xargagay
- Oo xayaabada
- Xooyo sare ku leh
- Xaayo mooye
- Xoola kale maleh

Maahmaahyo

- Lax walba shilalkey is dhigto ayaa lagu qalaa.
- Lax dhukani col iyo abaarba moog
- Wanka ilaa la gawroco indhuhu kor ma arkan

Riyo

- Hadaan gabadhii
- Guduud haydoo
- Garaarka kaga iman
- Wale garawacad
- Goosan baa maqan
- Garooy gara daa
- Oo garba cas daa
- Adna giiroy
- Ka gu wanide
- Gar darada daa

Maahmaahyo

- Riyuhu iyagaa rafkooda shabeelka ku doonta.
- Riyi gurigay ku dhashay ku gudhaa.
- Ninkii ceesan riyaad waydiinta kugu dhiba waydiideeda lagu dhibaa.

Gammanka (Fardo,Baqlo,Dameer)

Fardaha

Da’da fardaha waxay gaadhaan	Sidokoodu waa	Cida fardaha	
50-60 sano	11 bilood Iyo 50 casho	Danan	

Markaay gaaran tiro doora wegan
Geenyo markaay u bahan tahay faras waa **Beeddal**
Farasku markuu geenyada u tagayo waxaa ladhaha **kudid**
Riyuhu lo'da waxay uga eg yihiin **kabtida** iyo **Kamiinta.**

Maahmaahyo

- Faras amaaned ilkihiisa lama tiriyo
- Faras ama kujoog ama kajoog

Heesaha

- Warbulaalow
- Baana baahiyo
- Beeni dhimato
- Bari waa socad
- Haddii galin hore
- Geela laka tago
- Oo warku is galo
- Gaar higaaleed
- Gabac yeeyow
- Ashkir oog low
- Aroos uma galin
- Aboobse imari
- Bilaa dhudayare
- Dhiila maqaalyoo
- Dhulka tiiftif

Midaba fardaha

- Bullaale
- Xamar
- Ashkir
- Ashkir
- Caynab
- Baroor
- Qaaye /Baod
- Caddaan

Heeso Dammero

- Dameerahaagu
- Waa walaalo
- Wax lasiyaabo
- Waa wadaago
- Dameer kuus malaha
- Oo kabaal maleh
- Koori gibiniyo
- Kaluu leeyahay

Duur joogta (ugaar &Dugaag)

Ugaarta	Lab	Dhedig
Geel		
Garanuug	Liig	Gororto
Baciid	Saryan	Gosol
Gorayada	Haldhaa	Goyaro cowl
Cawsha	--jaxar	
Maroodi	Arbe	Galanso
Jeerta		
Wiyisha		
Gunburi		
Dameergarow		
Goodir		
Saagooro	Atoor	Yac

Dugaag (wixii hilib cun ah)

	Lab	Dhedig
Libaax	Aar	Gool / Barabar
Waraabe		
Shabeel	Aareyo	Nibso
Haram cad		
Dhidar		
Jiifaa		
Dabacadeeye		
Dawaaco	Daaxuur	Saayo
Daayeer		

Sooyaalka soomaaliyeed

Puntlnad

Dhulkii uduga waxaa bixisay gabar ka mida faraaciinti masaarida oo la yiraahdo (**Xetsheb suti)** 500 oo sano kahor **ibnu batuuta** qarnigii saddex iyo tobnaad 1331.

Halgankii 1aad ee axmed guray Q 15aad

Axmed Ibraahim Al qasaali wuxuu dhashay 1488 wuxuu ku dhashay tuulo yar oo waqooyi ka xigta magaalada harar oo loo yaqaan **Hoobat** wuxuu kubar baaray **Harar.**
Wiligaa waxaa jiray boqortooyo saylac ilaa harar is haysa **Adal** waxaa ku xigay **Abobokar**
Xuseen gaatiri wiilay isku arda ahaayeen axmedguray .
Sheikh haaruun waa sheekhii ahmed guray **dalwaan baray** waxay ahayd xaaskii ahmed guray 1527 waxaa la dilay garaad aboon waxaana dilay xabashida.

Dagaalkii ugu horeeyey ee ahmed guray wuxuu ka qaaday **shinbiro karo** wuxuuna socday 1529-43 ciidanka ahmed guray 12,000 ciidanka xabashida 60,000 .
Libna dangal wuxuu ahaa boqorkii xabashida ciidanka saddex geesooda waxaa kala hogaaminayey

1. Xuseen gaatiri fardoolay calanka cadaanka caddaan
2. Nuur fardoolay hurdi
3. Wasiir cadli lug iyo faras xidig 5geesoda

1531 waxaa dhacay dagaal ka dhacay **Darwaa** iyo**shawa** wuxuu ahmed qabsaday laska,itat amhara.

1533 wuxuu qabsaday tigree,**Guraago,Hadimo.**
1540 waxaa soo galay ciidamo burtiqiisa 350-400 waxay kasoo dageen degeda **Casab.**
1540 waxa dhintay libna dangal ciidanka waxaa watay **chiristopher vasco degand.**
1542 waxaa is haleelay ahmed guray iyo galad meesha la yirahdo ansa.
Dilkii ahmed guray kadib waxaa xukunkii qabsaday **Amiin nuur .**
Booskii libna dangal waxaa qabsaday **Gelowdews)**1540-1559
Dalwan bara 1559 waxaa gursaday Amiir nuur

Qarniyadii ay soomaalidu calanwalay naysay

Waa qarnigii 17aad 18aad iyo 19aad **(Baraare & Barwaaqo)**

1884 qaybintii afriko ee reer yurub _____ ka dhacday magalada **Baarliin**

Todobaddii dal ee afrika qaybsaday

1. Ingiiska
2. Fransiiska
3. Spain
4. Biiljam
5. Talyaaniga
6. Portugal
7. Jarmalka
   Waxay dhacday 15 nov 1884-15 jan 1885- 26jun 1885 waxaa ka qaybgalay boqor milikh 1887 waa markii ugu horaysay ee ay ethopia dhul soomaaliyeed gacanta ku dhigto.

Sahmiyayaashii reer yurub

1. Rechard burton sh clle (ingiriiska)
2. Pike (fransiis)
3. Antonia cichi (talyaani)

Halgankii 2aad ee sayid maxamed cabdalle xasan

Sayidku wuxuu dhashay 1856 wuxuu ku dhashay baliga **sacmodeeqo** ama **Qoob fardood**

Carro seed magan waaa sayidka hooyadiis 1892 wuxuu aaday sayidku isaga iyo saddex dhalinyaro oo kale, wuxuu kaloo wax ka soo bartay s**h.maxamed saalax** Wuxuuna ka soo tagay degeda Barbara.

Waligii ingiriisku berbera (**cordeconx)** awgaas wuxuu yiri hadaan wadaadka hada laqaban meel fog baa laga doonayaa.

1. Rag
2. Fardo
3. Hub

Daraawiish asalkiisu waa faaaris macnihiisu waa **(Saahid)**waa ugo doomid diineed

Ducaale xirsi waa nin ka mida ilaaladii ingriiska.

1900 werarkii ugu horeeyey ee sayidku qaado jigjiga.

Col eric Swayne waa sarkaal ingriis ah oo sayidka la dagaalamay.

General mannig waa ninkii 3 mareh 1901 wuxuu ka dhacay af**bakayle** gaar ahaan **ceelcad.**

Waxaa kaloo dhacay cagaar wayne ,fardhadin 1902

Beerdhig Aguast 1903 Daratoole

General Egraton

10jan 1904 jidbaale waa goobta kaliya ee daraawiish lagaga adkaaday.

1901-1902 waxaa laga dilay ingriiska 12 sarkal .

Saddexdii wax yaabood ee sayidku ugu yimi bari

1. Dhul biyo leh
2. Dhul baad leh
3. Dhul dhufays ah bari ugu soo guur .

1904 sayidku waxaa uu dagay Eyl wuxuuna ka dhisay qalcadii **DAAWAD**

Talyaanigu wuxuu la heeshiiyey daraawish sababtoo ah inuu helo.

1. Nabad
2. Iyo inuu ogaado awoodda darawishta
   Sheikh xassan barsame wuxuu ka halgamay koonfur.
   1909 sayidku weeraray wardheer iyo walwaal.
   1909 waxaa dhacay dagaalkii dulmadoobe oo uu ku dhintay **(Koofil)**
   Doughs jirdine oo qoray book layirahdo (**mad mullah of Somaliland)**
   1921 daraawiishta waxaa laga dugeeyey dhunka circa
   1921 waxaa dhintay daraawiish sayid maxamed cabdalle xassan oo ku dhintay (**Iimay)**

Maxaa dhacay darawiish ka dib

Boqor cismaan iyo garaad maxamud cali shire ayaa la xiray

Kaligii asayle waxaa ahayd dhacdo ka dhacday agaa qorayaale inuu talyaanigu dad shacaba uu ku tuntay isagoo gacan uga gudbaya.

1922 soomaalida xoolohooda waxaa laga qaadi jiray gibir.

Col ujooga aadan jugle waa ninkii dilay garyaqaankii **(Giib)**

Sheekh maxamed yare wuxuu ku xukumay inay magtiisu tahay 33 halaad lakiin waxa la bixiyey 33,000

Ragii dame ee la iyana kacdoonka sameeyey sheikh bashiir ,faarax oomaar, maxamud xarbi.

Waxaa kaloo dhacay gawracii gumaysiga waxaa arintaa ka xumaday riyaale gaax nuug waxaana ninkii xudduuda jeexayey dilay **bahdoon diirane.**

1933 waxaa yimi hargaysa 6 nin oo sameeyey khayriya hargaysa waxaana hogaaminayey qoryare.

Hakgankii 3aad ee dhalinyaradda soomaaliyeed

15 may 1943 waxaa ladhisay **Somali youth club** (SYC) Kadibna labaxay **somali youth leego (**SYL).

1. Yaasiin xaaji cismaan sharmaarke
2. Xaaji maxamed xuseen
3. Cabdiqaadir sakhaawudiin
4. Dheere xaaji dheere
5. Daahir xaaji cusmaan
6. Khaliif hadow macalin
7. Maxamed faarax hilawle
8. Maxamed cali nuur
9. Maxamed cabdalle xayeeeshi
10. Maxamed cismaan baarbe
11. ---
12. ---
13. ---

- 1946 waxaa laqabtay shirkii sida laga yeeli lahaa soomaliya
- 1948 waxaa la soo diray wafti xaqiiqa raadin ah.
- 1949 waxaa la dilay 53 nin oo talyaani mudaharaadkii **dagax-tuur**
- Soomaaliya waxaa loosaaray saddex dal oo ah
    1. Maser
    2. Colombia
    3. Filipin

    Masar waxaa la shaqaynaysey soomalida si ay xoriyad u hesho waxaana horboodaayey kamaaludiin saalax .
    Waxaana kaloo jiray safarkii khan (**Pakistan).**
    Saint lotwuxuu u dhashay **haity.**
    1950waxaa bilawday daakhiliga ah.
    c/laah ciise wuxuu madax ka noqday dawladii daakhiligii.
    Mure waa ninkii la talaalay badalka claahi .
    1950 12 abrile waa ugu horeeysay la arko calan soomaaliyeed.
    26 ju 1960 ayaa gobadallada waqooyi xoroobey.
    Cral wuxuu ahaa gudoomiyeye waqooyi galbeed ee gumays taha.
    1 july 1960 xoriyadii koonfur iyo israacii gobolada waqooyi iyo gobalada koonfur.
    1960-67waxaa la doortay madax waynihii ugu horeeyey ee soomaaliyeed.
    1967-69 waa hayey **c/rashiid cali sharmake.**
    21 Oct afgambigii milla tariga.
    25 nin oo ahaa golihii kacaanka
    26 Jan 1991 madax wayne maxamed siyaad barre wuxuu ka baxay **mugdisho.**

Deegaanka

Badka :- 638.627Km^2

Dhul sare waxuu ka bilawdaa buuraha **qabno** ee gobolka hiiran

Dhulka siman waa wixii gobolka hiiraan dhanka koon fureed ka xiga marka laga reebo labada buureed ee **buur-xakabo iyo buurayle,** 8000.00 hikter ayaa dhul beereed ah.

Dhul beereed (waa dhulka ku wanaagsan beerashada)

Dhul safaane ah (dhul cawseed)

Wabiga shabeele wuxuu ku dhamaadaa daallada **Dhaytubaako**dhererkiisu waa 1500 km

Jubba wuxuu bada kaga darsamaa (**goobweyn)**

Sanguuni waaa tuulada uu dhulbaruhu maro.

Xeebta soomaaliya 33333Km.

Abla ablayda dhirta

Dhirta waxaa loo kala saara

Geed sare

Geed hoose

Geed qodaxeed

Geed mirood

Geed abaareed

Geed cawseed

Geed qodaxeed	**Geed cawseed**
Damal	Durecmo
Galool	Safaar
Qurac	Gargaro
Bilcil	Dixi
Qansax	Taacug
gob	Duur

Geed madaw	**Dhir bari leh**
Maygaaga	**Marooro**
Jiic	Wamo
Higlo	Gasangas
Qalanqal	------ban koolis
Caday	

Qaabsamaysanka dhulka

Buur

Banaan

Dooxo

Tog

Carris

Biyaha

Dabaysha